

Khayraadka Kaalmada Sharciga ee Maine

Adeegga Gudbinta Qareenka (800) 860-1460 ama onlayn barta: www.mainebar.org/page/AttorneyRequest

Lacag \$35 ah markuu bixiyo, qofka waxa loo gudbin doonaa qareen wuxuuna heli doonaa la talin ½ saac ah. QOF KASTA WAA U QALMAA ADEEGGAN.

Khadadka taleefanadu waxay furan yihiin Isniin, Salaasa iyo Khamiis laga bilaabo 8:30 g.h. ilaa 3:30 g.d. iyo Jimce laga bilaabo 8:30 g.h. ilaa 12:00 g.d. Codsiyada gudbinta onlaynka ah waxa la samayn karaa 24/7 (wakhti kasta).

Jawaabo sharci oo madani ah oo bilaash ah ayaa lagu siin karaa isticmaalayaasha u qalma: www.maine.freelegalanswers.org

Liiska hoose waa guudmar ah meelaha sharciga ee wakaalad kastaa ku shaqo leedahay. Toos ula xiriir wakaaladda si aad u ogaato haddii aad u qalanto adeegyadooda.

Wakaaladda	U qalmidda adeegga	Faa'idooyinka (TANF & tigidhada Cuntada)	Mushkiladaha & Busaaradda Daymaysnaha	Sharciga Furriinka & Qoyska	Qalalaasaha Qoyska	Mushkiladaha Guri-ka-saaridda & Kiraystaha	Mushkiladaha Shaqaalaynta	Hanti la Wareegidda & Guryeynta Kale	Daryeelka Caafimaadka	Mushkiladaha Haajiraadda & Muwaadinimada	Mushkiladaha Dhallinyarta	Mushkiladaha Sharci Madani ee Kale
Xuquuqda Naafada Maine (800) 452-1948 www.drme.org	Dadka Naafada ah	✓				✓	✓	✓	✓		✓	✓
Mashruuca U-Doodista Sharci ee Muhaajirka (800) 497-8505 www.ilapmaine.org	Sabool	✓			✓					✓	✓	✓
Adeegga Sharci ee Waayeelka Maine (800) 750-5353 www.mainelse.org	60 ama ka wayn; caawimada Medicare ee cid kasta loogu talagalay	✓	✓		✓	✓	✓	✓	✓			✓
Shuraakooyinka Cadaaladda Loo Siman Yahay ee Maine (866) 626-7059 www.mejp.org	Sabool	✓					✓		✓	✓	✓	✓
Kaalmada Sharciyeed ee Pine Tree www.ptla.org Augusta (207) 622-4731 Bangor (207) 942-8241 Lewiston (207) 784-1558 Machias (207) 255-8656 Portland (207) 774-8211 Presque Isle (207) 764-4349	Saboolka & Milatariga/ Halgamaayada	✓	✓		✓	✓	✓	✓	✓		✓	✓
Mashruuca Qareenada Isdira (800) 442-4293 www.vlp.org	Sabool		✓	✓	✓	✓	✓	✓				✓
Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Maine: Adeegga Kaalmada Sharciga ee Cumberland (877) 780-2522 mainelaw.maine.edu/public-service/clac/	Sabool; Matalaadda qareenada ardayda ah sameeyaan		✓	✓	✓	✓	✓	✓		✓	✓	✓

Guddida Maine ee Adeegyada Difaaca Dadwaynaha waxay matalaan eedaysanayaasha faldambiyeedyada ee saboolka ah, eedaysanayaasha da'da yar, waalidka kiisaska ilaalinta ilmaha, dadka waajahaya in si khasab ah loogu hayo isbitaal waalli, kuwaasi oo xaq u leh inay helaan garyaqaan siduu dhigayo Dastuurku ama sharciga Maine.

(207) 287-3257

www.maine.gov/pds/